# Dhageysiga Dacwadaha Qoyska
# Maxkamadda Sare ee Degmada King

**Ma kugu soo fool leedahay dacwad qoyska ah? Haddii ay sidaas tahay, dhawr waxyaabood ayaad kala dooran kartaa**

Waxaa jira laba dacwadood oo maxkamadaha qoyska ah Maxkamadda Sare ee Degmada King. Dhageysiga dacwadaha qoyska waa kuwo ku saabsan furiinka, kala guuritaanka sharciga ah, booqashada ilmaha, dib u dajinta ama taageerada dhaqaale ee caruurta. Labada nooc ee dhageysiga maxkamadaha waxaa loogu yeeraa Dhageysiga Dacwadaha Qoyska ee Aan Rasmiga Aheyn (FLT) iyo Dhageysiga Habkii Hore. Adiga ayaa go'aanka iska leh nooca dhageysiga ee ku wanaagsan xaaladaada. **Dhageysigaaga waxa uu noqonayaa IFLT hadii ay labada dhinac isku raacaan halkii loo qaban lahaa Dhageysiga Habkii Hore.**

| | Dhageysiga Aan Rasmiga Aheyn | Dhageysiga Habkii Hore |
|---|---|---|
| **Dhageysiga Dacwaddu ma mid rasmi ah baa?** | Aan rasmi aheyn | Rasmi ah |
| **Sidee ayuu dhageysigu ugu fudud yahay qof aan qareen laheyn?** | Mid u fudud | Mid adag |
| **Waa maxay cadeynta uu qaaligu tixgelinayo?** | Qaaligu waxa uu eegayaa wax kasta oo dhinacyadu soo gudbiyaan waxaana uu go'aan ka gaaraa macluumaadka muhimka ah ee la tixgeliyo. Dhinacyada dacwaddu waxa ay weydiisan karaan qaaliga inuu eego qoraal kasta oo la soo gudbiyo oo ay ka mid yihiin hadalka ay qoraan dadka la dhaariyey. | Qaaligu waxa uu tixgelinayaa oo kaliya cadeymaha uu sharcigu ogol yahay sida Sharciyada U Degsan Cadeymaha. Dhinacyadu waa in ay diidmadooda soo jeediyaan haddii ay doonayaan in qaaligu aanu tixgelin cadeymaha. Dhamaan dadka ka marag kacaya dacwadda waa in ay maxkamadda hor yimaadaan. Labada dhinacba waxaa loo ogol yahay in ay su'aalo weydiin karaan markhaati kasta. Guud ahaan, qaaligu ma tixgelinayo cadeymaha ay afka ka sheegaan (labada dhinac). |
| **Yaa su'aalo weydiin kara?** | Qaaliga kaliya ayaa weydiin kara su'aalo dhinacyada kala duwan. Haddii uu qof khabiir ka markhaati furo maxkamadda, dhinacyada kala duwan su'aalo ayey weydiin karaan. | Dhinacyada kala duwan ama qareenadooda, laakiin qaaliguna sidoo kale su'aalo ayuu weydiin karaa. |
| **Qaaliga si toos ah ma ula hadli karaa?** | Haa | Qaaliga si toos ah ayaad ula hadli kartaa marka aad ka markhaati fureyso maxkamadda, hadalka furitaanka ah iyo hadalka gunaanadka ah. Dhinaca waa ay cabiri karaan diidmadooda marrka aad markhaati fureyso. |
| **Yaa markhaati ka ah dacwadda?** | Inta badan dhinacyada ay dacwaddu u dhaxeyso iyo mas'uulka maxkamadda ka wakiilka ah, haddii uu jiro. Qaaliga ayaa ogolaan kara dadka khubarada ah ee ka maarkhaati furaya maxkamadda sida dhakhaatiirta, la taliyayaasha iyo qiimeyayaasha. | Liiska markhaatiyaasha dhinacaaga iyo dhinaca kale waa in la is weydaarsadaa dhageysiga ka hor. |
| **Su'aalo ma weydiin karaa markhaatiyaasha?** | Maya, laguuma ogola in aad su'aalo weydiiso dhinaca kale. Marka aad markhaati furto, dhinaca kale hadalkaaga ma dhex geli karo. Dhinacyada kale waxaa loo ogol yahay in ay su'aalo weydiin karaan qaaliga si ay uga ogaadaan waxyaabo gaar ah. | Haa Adiga ama qareenkaaga (haddii uu ku matalayo) waxaa loo ogol yahay inuu su'aalo weydiiyo dhinaca kale iyo dhamaan markhaatiyayaasha. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in markhaatiyaasha aad weydiin karto in ay ka hadlaan waxyaabaha aad is leedahay waa muhim. |

## Maxaad U Dooraneysaa Dhageysiga Dacwadda Ee Aan Rasmiga Aheyn?

1. Waayo sharciyada yar ayaa lagu maamulaa, dhageysiga aan rasmiga aheyn waa mid ka dabacsan kan kale. IFLT ayaa u fudud dadka aan laheyn qareen ee is matalaya. Qaaliga ayaa ka qeyb qaata su'aalo weydiinta iyo nidaamka la raacayo. Qaaliga ayaa dhinacyada ka caawinaya in ay xoogga saaraan qodobo gaar ah oo qaaligu go'aan ka gaaro.
2. Si toos ah ayaad qaaliga ugala hadli kartaa xaaladaada iyada oo aan hadalka laga dhex gelin ama diidmo la hor dhigin dhinaca kale ama qareenka dhinaca kale. Dhinaca kale ama qareenka dhinaca kale looma ogola inuu su'aalo ku weydiiyo.
3. Ma aha in aad ka walwasho nidaamka rasmiga ah ee la raacayo sida Sharciyada cadeymaha ee xadidaya waxyaabaha aad maxkamadda ka dhihi karto. Waxa aad:
    - Si xor ah ayaad ula hadli kartaa dadka aan maxkamadda aan goob joogga aheyn.
    - La hadal qaaliga waxyaabaha ay caruurtaadu ka yiraahdeen cidda ay la noolaanayaan iyo booqashada caruurta; oo
    - U sheeg qaaliga waxyaabaha aad is leedahay waa muhim inta aanu qaaligu go'aan ka gaarin dacwadaha.
4. Waxa aad qaaliga siin kartaa qoraal kasta oo aad is leedahay waa muhim.
5. IFLT waxaa laga yaabaa in ay muddadu gaabnaato. Waxaa laga yaabaa in aad fasax kooban ka qaadato shaqada. Hadii aad leedahay qareen, waxaa laga yaabaa in ay muddo gaaban isugu diyaarin karaan dhageysiga. Sidaa darteed, lacagta aad u baahan tahay inuu qareen ku matalo waa mid ka yar dhageysiga kale.

## Maxaad U Dooraneysaa Dhageysiga Dacwadda Ee Habkii Hore?

1. Waxaa la raacaa sharciya iyo xeerarka u degsan. Sharciyada Cadeymaha ayaa la raacayaa. Adiga iyo qareenkaaga waxaa laga yaabaa in aad habkaas doorataan.
2. Waxaa laga yaabaa in aad doorataan Sharciyada Cadeymaha oo xadidaya waxyaabaha uu qofku ka sheegi karo ama u gudbin karo maxkamadda. Waxaa laga yaabaa in ay jiraan waxyaabo dheeraad ah oo u baahan in racfaan laga qaato taasoo la xiriirta istricmaalka Sharciyada Cadeymaha.
3. Habka su'aalaha iyo jawaabaha waa kuwo ku wanaagsan in qofka looga helo macluumaadka khuseeya dacwadda. Waxaa laga yaabaa in ay muhim tahay in aad su'aalo dheeraad ah aad weydiin karto dhinaca kale.
4. Waxaa laga yaabaa in loo ogolaado inuu maxkamadda ka markhaati furo markahaati kasta oo aad is leedahay waa muhim.
5. Guud ahaan, qoraal ay soo qoraan dadka kale sida xubnaha qoyska, macalimiinta, iyo saaxiibada ma tixgelinayo qaaliga. Dadka doonaya in ay wax ka yiraahdaan xaaladaada ama xaaladda qofka kale waxaa laga doonayaa in ay yimaadaan oo ka hadlaan dhageysiga maxkamadda.
6. Dacwadaada ayaa ah mid aad u cakiran. Adiga iyo qofka kale ayaa wadaaga ganacsi ama wada leh warqadaha lacagta u dhigma, hanti, ama xisaab hawlgab oo u baahan in la qeybiyo.